



WAR-SAXAAFADEED

Daahfurka Goobaal Online: Diiwaanka Ganacsiga Haweenka Soomaaliyeed

Muqdisho, 19-ka Nofembar 2021: Si loo xuso maalinta caalamiga ah ee Ganacsiga Haweenka, shirkadda la talinta Asal Consulting, oo kaashaneysa Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed/ *Somali Chamber of Commerce and Industries* (SCCI) iyo Ururka Shaqaalaha Adduunka/*International Labour Organization* (ILO), waxaa ay si rasmi ah u daahfureen Goobaal Online, oo ah adeeg khaas ah oo loogu talagalay ganacsiyada ay leeyihiin Haweenka Soomaaliyeed oo doonaya in ay kobciyaan ganacsigooda.

Madashan online-ka ah ayaa noqon doonta fursad ay Haweenka ganacsatada ah ku xayeesiiyaan ganacsiyadooda muuqaal ahaan barta *internet*-ka. Macluumaadka ku jira Goobaal Online ayaa ku qoran afafka Soomaaliga iyo Ingiriisiga-ba, iyadoo madashan *internet*-ka ay tahay diiwaan ay ku keydsan yihiin ganacsiyada jira.

Fikradda ah in la helo diiwaan barta *internet*-ka ku jira oo beegsanaya ganacsiyada ay leeyihiin Haweenka Soomaaliyeed ee doonaya in ay kobciyaan ganacsigooda, waxaa ay ka dhalatey markii la ogaadey in badi ganacsiyada Haweenku leeyihiin aaney ku jirin ama ay aad uga muuqan *internet*-ka.

Sidaa daraaddeed, ganacsatada Haweenka waxaa dhaafaya fursado haddii ay ku jiri lahaayeen *internet*-ka ay kor ugu qaadi lahaayeen ayna ku kobci lahaayeen ganacsigooda iyo tirada macaamiishooda. Fikraddu waxaa sidoo kale ay ku fadhidaa xaqiiqda ah in badi ganacsiyada ay leeyihiin Haweenka Soomaaliyeed aaney awoodin in ay iska bixiyaan kharashka badan ee loogu baahan yahay nakh-shadeynta, martigelinta iyo gacan-ku-haynta barta *internet* oo uu lahaado ganacsi keliya.

“Dhisidda qaranku waa tallaabo-tallaabo. Rugta Ganacsiga Iyo Warshadaha ayaa ugu jirta dadaal joogto ah sidii eey ku kobcin laheyd doorka Haweenka ganacsatada Soomaaliyeed. Iyaddoo looga faa’iidenayo fursadaha isticmaalka internet-ka.”

Fariin ka socota Rugta Ganacsiga iyo Warshadaha Soomaaliyeed

“Iyadoo ay si joogta ah u kordhayaan macamiisha internet-ka ka eega ama dalbada badeecooyinka iyo adeegyada, waxaa noo muuqatay fursad aan ku xiriirin karno macaamiisha iyo ganacsiyada Haweenku leeyihiin maaddaama badi ganacsiyada Haweenku aaney haysan dhaqaale ay ku dhisan lahaayeen bar internet. Hadda oo uu jiro Goobaal Online, macaamiisha iyo milkiilayaasha ganacsiyada ayaa si fudud isu heli kara iyaga oo aanan ka bixin kharash. Goobaal Online waxaa maamuli doona SCCI, taasoo noqon doonta mid ka mid ah adeegyada ugu muhiimsan ee lagu kobcinaayo dhaqaalaha Soomaaliya iyo kan Haweenka ganacsatada Soomaaliyeed.”

Fariin ka socota ILO



“Adeegga Goobaal online waxaa in badan ka faa’iideysan kara Haweenka ganacsiga ku leh Soomaaliya. Adeegan oo awood u siinayo in ay ka helaan fursad ay ku kordhiyaan macaamiisha imaneysa goobahooda ganacsiga iyo macaamiisha ka eegeysa baraha internetka iyo bogagga baraha bulshada. Haddii ganacsigu uusan haysan bar internet, Goobaal Onlinee ayaa u noqonaya bar internet. Arrintan ayaa ah mid ka mid ah faa’iidooyinka uu Goobaal online siinayo Haweenka ganacsiga ku leh Soomaaliya. Si aad wax badan uga ogaato Goobaal online, booqo: www.goobaal.so”

Fariin ka socota Asal Consulting

Haddii aad tahay Haweeney Soomaaliyeed oo ganacsi leh, oo aadna dooneyso in Goobaal Online uu ganacsigaaga gaarsiiso heerka ku xiga kan aad hadda joogto, booqo, <https://www.goobaal.so/>. Halkaan ka daawo sharaxaad faahfaahsan; <https://www.youtube.com/watch?v=4lnud8bLHQ8>

Waxaa ganacsigaaga aad internet-ka ku gelin kartaa daqiiqo adiga oo wax kharash ah bixin. Marka aad furto barta internet-ka, guji badhanka “Register” oo raac tilmaamaha lagu siinayo si aad waqti yar ugu diyaariso xogta ganacsigaaga ee aad gelisoneyso internet-ka.

Goobaal waxaa suurageliyey deeqda ay bixisey Hay’adda Horumarinta Caalamiga ah ee Sweden/*the Swedish International Development Agency (SIDA)*, oo la soo mariyey mashruuca Iskaashiga Ganacsatada iyo Maamulka ee Tamarta La Cusbooneysiin Karo iyo Awoodsiinta Dhaqaale ee Haweenka/*“Public-Private Partnership for Renewable Energy and Women’s Economic Empowerment”* ee ay hirgelisey ILO.

Nagala Soo Xiriir

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeri ah, waxaad nagala soo xiriiri kartaa info@goobaal.so